

# Ku soo dhawoow shaqada xilliga fasaxa ee degmada Växjö ee xagaga 2019!

*Buug-yarahan waxaad ka heli doontaa macluumaad muhiim ah oo aad u baahan tahay in aad hesho ka hor shaqadaada fasaxa ee degmada Växjö.*

## **Warbixinta imaanshaha Shaqada**

Waxaad heshay foomka warbixinta imaanshaha shaqada oo aad maalin kasta buuxin doonto, ka dib waqti kasta oo aad shaqayso. Waxaad buuxinaysaa inta saacadood ee aad shaqaysay iyo inta jeer ee aad nasatay iyo muddada nasashada aad qaadatay. Haddii aad xanuunsatay ama sabab kale aad uga maqnayd shaqada, sidoo kale waa inaad meesha banaan ku buuxisaa maalin ama maalmaha aad maqnayd.

Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad buuxiso warbixinta imaanshaha/xaadirida shaqada iyo in aad ka saxiixdo kormeerahaaga goobta shaqada ee aad ka shaqaynayso. Sidoo kale adiga ayaa noo soo diri doona warbixinta imaanshaha/xaadirinta ama haddii kale ku rid sanduuqa boostada ee ku dhegan dhinaca midigta ee iridda laga soo galo Bergendahlska gården. Waxaad ka heli doontaa macluumaadka oo dhan gadaasha buug-yarahan. Waa masuuliyadaada in aad anaga noo soo gudbiso warbixinta imaanshaha/xaadirinta kadib markaad dhameyso shaqada. Haddii aad soo gudbin weydo warbixintaada imaanshaha/xaadirinta, mushaarka lama bixin doono.

## **Maqnaansho**

Waa in aad si toos ah u soo sheegtaa ka maqnaanshaha goobta shaqada, tusaale, markaad jiran/xanuunsan tahay. Lama bixiyo mushahar xanuun/jirro. Waa inaad shaqeysaa mudada lagu xilsaarey. Haddii ay dhacaan wax sababaya in aad shaqeyn kari weydo muddada lagu xilsaarey, waa in aad nala soo xiriirto sida ugu dhakhsaha badan ee suurto ah si loo helo qof lagu bedelo!

### **AAD U MUHIIMA!**

Soo ogow haddii goobtaada shaqadu kugu xirto inaad soo gudbiso warqada dambi la'aanta ee booliiska! Haddii goobta shaqadadu u baahan tahay warqadan, waa in aad sida ugu dhakhsaha badan u codsataa warqada dambi la'aanta una gaynaysaa masuulka goobta shaqada **ayadoon la furin**. Waxay qaadan kartaa dhowr toddobaad inta warqadani ay kuugu soo dhacayso boostada. Waxaad ka helaysaa foomkan bogga internetka Booliiska. Waxaa loogu yeeraa "**Caddaynta shakhsi keli ah - sida ku xusan §9**" iyo "**Caddaynta shaqada ee iskuulka ama xanaanada**".

**Ogsoonow in goobta shaqadu ay diidi karto shaqadaada haddii aadan sidan warqada cadaynta ah!**

## Bixinta mushaharka

Bixinta Mushaharka waxa lagu dirayaa Swedbanka Växjö. Warqaddan waxa la socda foomka diiwaangelinta koontadada kaas oo aad u diri doonto xafiiska Växjöloftet sida ugu dhakhsaha badan laakiin ugu dambeyn 28 Juuni aad u hesho mushaarkaaga oo koontada kuugu jira. Ogsoonow in ay adiga tahay qofka koontada ku qoran (tusaale, maaha koontada Hooyo ama Aabe). Haddii aadan haysan koonto/ codso ka hor 28 Juun, mushar kaaga waxa lagu bixin doona jeeg waxaana laguugu soo hagaajin doona boostada, cinwaankaaga diiwaangelinta dadweynaha (adareeskaaga).

Fadlan ogow in aysan jirin taariikh dib loo dhigayo bixinta mushaarka. Sida caadiga ah taariikhda mushaar bixintu waa 27-ka bil kasta. Marka aad helayso mushaharkaaga waxay ku xiran yahay taariikhda aad noogu soo gudbiso warbixinta imaanshahaaga shaqada xafiiska shaqada ee Växjöloftet (maaha goobta aad ka shaqayso). Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan taariikhda lacag bixinta oo tafatiran, nagala soo xidhiidh xafiiska shaqada ee Växjöloftetsommar.

## Cadaynta mushaharka oo aan cashuur laga jarin

Hadii sannadkan 2019 aanu mushaharkagu ka badnayn 19 670 kr, waxaad qaadan kartaa mushahar aan cashuur laga jarin. Waxaad ubaahan tahay inaad sameyso waa, in aad buuxiso foomka ku lifaaqan warqadan ee cadaynta in aan mushaharka laga jarin canshuur (Lön utan skatteavdrag). Foomkan waxaad ka heli kartaa dhinaca dambe ee foomka warbixintaada imaanshaha shaqada. **OGSOONOW** in ay tahay **adiga** cida buuxinaysa dhammaan meelaha banaana ee foomka isla markaana saxiixaysa cadaynta in aan mushaharka laga jarin canshuur, hoosta waxaad ka arki tusaale ahaan sida loo buuxinayo:

Jag har tagit del av upplysningarna ovan. Jag uppfyller villkoren för befrielse från skatteavdrag.	
Namn	Anna Andersson
Personnummer	990101-XXXX
Adress	Lidbergsgatan 14-16 351 12 Växjö
Underskrift	
Datum	2017-04-28
Namnteckning	

### liiska hubinta ee ka horeeya shaqada xilliga fasaxa:

- ✓ Ka dalbo warqada cadaynta diiwaanka booliska (ha furin buqshadda). Soo ogow haddii lagaaga baahan yahay inaad u gudbiyo meesha aad ka shaqaynayso.
- ✓ La xiriir goobta aad ka shaqaynayso (Xafiiska xagaaga ee Växjö ma aha goobta shaqada).
- ✓ Dhawr ama ilaali wakhtiga.
- ✓ Ixtiraam xeerarka/shuruucda u yaala goobta shaqada.
- ✓ U oggolow telefoonku inuu nasto (dami telefoonka).
- ✓ Si taxadar leh u akhri macluumaadka ku saabsan mushaarka ee kor ku xusan.
- ✓ Su'aalaha ku saabsan mushaharka, had iyo jeer la xiriir, ugu horeeyna xafiiska xagaaga ee Växjö (Växjösommarkontoret).

# Xidhiidhka

Simon Lundqvist      Tel: 0470-79 64 15  
Ronja Sköld            Tel: 0470-416 81

## Mailadress

vaxjoloftetsommar@vaxjo.se

## Postadress

### **”Växjöloftet sommar”**

Bergendahlska gården

Växjö Kommun

Arbete och Valfärd

Box 1222

351 12 Växjö

## Besöksadress

Bergendahlska gården

Liedbergsgatan 14-16, Växjö